

Duruusta aynu ka baran karno tallaabooyinkii Sheekh Madar ee aasaaska Hargeysa.

Taxane Salaasa kasta ku soo baxa wargeyska Haatuf.

Sannadku waa 1867, goobtuna waa Hargeysa. Waa duur jiq ah oo ay qarisay dhir cufan oo kala duwan, iskuguna jirta kuwo dhaadheer iyo kuwo gaagaaban, una badan qudhac, cadaad ergin iyo dacar. Waa goob aan cididhex degin xoolahana aan la daaqsiiin oo reeruhu markay guurayaan si degdeg ah oo feejigan u dhaafaan ama hareeraha ka maraan iyagoo ka cabsi qaba saddex cadow oo Ilaahay goobtan ku mannaystay. Waxay goobtu hooy iyo baro gaadmo u tahay libaaxyo raxan raxan ah oo aan dad iyo xoolo tooni ka nabadgelayn. Dhulka hoose waxaa mulacyeynaya masas noocyo badan, oo badidoodu waabay sun ah ka buuxaan, qofka ay micida la helaanna aanu nolol dhulka ula dhacayn. Waxaa intaasi dheer kaneece gabood ka dhigata dhirta cufan ee goobtani ku caanka tahay, dadkuna aad uga baqaan duumada ay qaniinyadeedu keeni karto.

Duurjoogta iyo ugaadh noocyo badan ayaa dhex mushaaxda goobtani, tiyoo aad moodid in qala yarida, dad iyo xoolaba, ee goobtan looga caagay saddexdii cadow ee aynu kor ku soo sheegnay, ay sababtay in ay noqoto xarun ay isku soo urursadaan ugaadh oo idili. Waxaana siiba aad ugu badnaa shabeelka, sakaarada, biciidka, dibtaagta iwm. Sidoo kale wuxuu dooxa Hargeysa noqday wadiiqo uu maroodigu ugu kala gudbo goobaha uu xilliyada kala duwan isku bedelo.

Dadka agagaarkeeda degani waa reer guuraa xoolo dhaqato ah oo kolba u guura halka ay baad iyo biyo xoolahaooda uga heli karaan. Ragga oo idili waxay wada sitaan warmo iyo gaashaamo. Waxayna badidoodu fuushan yihiin fardo midabyo badan. Taasoo inoo muujinaysa nabadgelyo darida goobta iyo colaadda dhegta loo taagayo.

Dadku waxay dhaqdaan geel, adhi iyo riyo. Baadku wuxuu yahay dan guud oo beelaha ku dhow goobtan ka wada dhexeeya. Beelaha fogina way u soo guuraan haddii ay daaqa iyo roobku ku kellifaan. Hase ahaatee waxay beeluhu kala sheegtaan ceelasha la qodo iyo biyahooda. Labada ceel ee ugu dhow goobtani waa ceelka Xaraf iyo ceelka Dhoqor (Aw Barkhadleh).. Cimilada iyo xilliga la joogo ayaa saamayn xooggan ku leh guuritaanka beelaha goobtani ag dega.

Waxay beelaha ay goobtani kulmisaa u qaybsamaan laba nooc oo xilli guurkooda iyo ag degista goobtani kala gedisantahay. Qaybta hore, oo loo yaqaan reer oogo ceelashooduna ku yaalaan oogada, waxay badanaa xilliga guga ee roobku da'o u guuraan dhinaca hawdka iyagoo u raadsadanaya naqa iyo biyaha roobabka guga. Marka ay baadka

iyo biyuhu ku yaraadaan hawdkana waxay dib ugu soo hayaamaan dhinaca oogada iyagoo u soo ceel fadhiisanaya ceelashooda oogada ka qodan. Qaybta labaad oo loo yaqaanno reer guban, ceelashooduna ku yaalaan gubanka waxay goobtani soo ag degaan xilliga guga oo gubanku aad u kulul yahay. Mararka qaarkoodna, hadii naq yaraani jirto, waxay u sii dhaafaan dhinaca hawd. Xilliga jiilaalkana waxay dib ugu laabtaan guban oo aanu kul jirin, baadkiina sii baxay.

Waxay dadka meesha degani ku dhaqmaan qaab beeled ku salaysan abtirsiiin iyo tolnimo. Qaab beeledkaasi oo nabadgelyada iyo hantida qofkaba ka dhiga mid beeshiisu masuul ka tahay Haddii qof ama hantidiisa lagu xadgudbo waxay beesha uu ka tirsanyahay u aragtaa in beesha oo idil ay ku xadgudubtay beeshaasi uu ka tirsanyahay qofka gefka galay. Taasi waxay abuurtay in xadgudubkii qof sameeyaba xubnaha beesha oo idili loo wada aaneeyo. Naf aan iyadu wax denbi ah galabsanna layska dilo tiyoo qof hore loo dilay loogu aarayo.

Kaasi wuxuu ahaa sawir kooban oo inoo iftiiminaya xaaladda Hargeisa iyo dadka ag degani ku sugnaayeen xilligii uu Sheekh Madar Axmed soo degay. Waxaa hadaba isweydiin mudan maxaa sheikh Madar ku kelifay inuu halkani dego? Muxuuna goobtan sawirkaasi aynu soo aragnay leh u doortay? Waa maxay himilada uu u socday ee uu ku talo jiray? Sidee buu imaatinkiisu u saameeyay goobtii iyo bulshadii ku noolayd agagaarkeeda ? Waa maxay se duruusta aynu ka korodhsan karno tallaabooyinkii sheikh Madar. Jawaabta su'aalahaasi ayuu qoraalkani inoo iftiimin doonaa.

La socio Salaasada danbe.